

Qoraaal Dhacdooyin Hubaal ah: Dumarka aan ku lahayn xuquuq daganaasho Canada

Sababaha dadku uusan ugu lahayn xuquuq deganasho Canada:

- Dad badan ayaa soo gala Canada ayaga oo wata ruqsad dal ku-jog ku-meel-gaar ah. Hadday dhaafaan waqtigii loogu tala galay; waxay luminayaan ruqsadda dal ku-joogga. Dadka qaarkiis waxay Canada ku joogaan si sharci la'aan ah muddo 10, 20 sano iyo in ka badan. Qaarkood waxay halkaan joogaan ilaa iyo yaraantoodii; waxna kama yaqaanaan dalalkii ay ku dhasheen oo ay halis u yihiin in dib loogu dhoofiyo.
- Dad badan waxay ku andacoodaan inay qaxoooti yihiin markii laga aqbali wayeena waxey doorteen in ay ku joogaan dalka sharci darro ah; intii ay ku noqon lahaayeen mustaqbal aan la hubin, ama xataa dimasho.
- Haween badan aya Canada ku yimid sharci ahaan (ayaga oo ay kafaala-qaadeen loo-shaqeeye, qofka ay is qabaan ama xubin qoyskooda ka tirsan), lakin waxey kala kulmeen dadki kafaala-qaadey xiriir had-kudub ah. Haddi ay ka cararaan ayaga oon helin ruqsada joogtada ah ee dal-ku-jookaa waxay noqon karaan kuwa aan dalka ku lahayn xuquuq deganaansho.

Tiro-koobiyo ku saabsan dadka Canada aan ku lahayn xuquuq daganaasho qaarkood:

- Dadka aan lahayn xuquuqda daganaashaha Dalka oo sharci ah waxay ku qasban yihiin in ay ku noolaadaan ama ku shaqeeyaan qarsoodi ahaan si ayaan dowladdu u dareemin oo aan dib loogu dhoofin. Sababataan awgeed ayeeyan u suurtoobin in la sameeyo tiro-koobo sax ah; hase yeeshee waxaa lagu qiyaasay inta u dhexeysa 20,000 ilaa 200.000 oo qof; lakin dad badan baa waxey qabaan in tirodu intaa ka badantahay.

Tiro-koobka haweenka la waxyeleeyo ee Canada:

(Fadlan ogoow in tiro-koobkan u ku saabsan yahay oo kali ah haweenka si sharci ah Canada ugu leh xuquuqda daganaashaha. Majiraan tiro-koobiyo u qaas ah haweenka la waxyeleeyo oo aan Dalka ku lahayn xuquuqda daganaashaha, in kastoo haweenka aan Dalka ku lahayn xuquuqda daganaashaha ay gaar ahaan halis ugu jiraan in la waxyeleeyo sababaha soo socda qaarkood.)**

- Bar ka mid ah haweenka Canada ilaayo 16 sano jirkoodi waxay la kulmayn ugu yaraan hal dhacdo oo jir-dil ah ama had-gudub u galmo ah.
- Ku dhawaad haweenka Canada Barkood (45%) waxay la kulmeen had-gudub ay ku sameeyeen rag ay yaqaanaan.
- Haweenka Canada 4 meelood melba waxay la kulantay jir-dil ama had-gudub u galmo oo ay ku sameeyeen raga qaba.
- 63% haweenka la waxyeleeyey waaxaa in mar ka badan ku had-gudbay qofka ay hadda ama ay horay ula noolaayeen; ama ninka qaba.
- 1/3 haweenka u ku had-gudbay ninka ay la noolayeen way u baqeen naftooda goor ka mida inta ay ku jireen hiriirka dulman.
- Haweenka ka tagay raga qaba waxay si gooni ah qatar ugu jiraan inay dilaan raga ay la lahaan jireen xiriir isu-tagideed.

- Sanadkii 1995ti boqolkiiba labaan iyo shan haweenka galay guryaha badbaadinta waxay qabeen dhaawac u baahday inay taqtar u tagaan; iyo 3% oo u baahday in la dhigo ispiitaal. (Bunge iyo Levett 1998, 19)
- 42% haweenka karaankoodu dhiman yahay waxey ku nolaayeen ama ku nool yihiin xiriir lagu waxyeeleeyo (DisAbled Women's Network 1989).
- Tobankiiba sideedba haweenka Aboriginalka ah ee Ontario waxay sheegeen in shaqsi ahaan loogu had-gudub (Ontarion Native Women's Association 1989, 7).

Tiro-koobyadaan intooda badan waxaa laga soo qatey shabakada internetka :
<http://www.cafv.inet2000.com/handouts/vaw/ViolenceAgainstWomenincanada.htm>

Carqaladaha ka hor yimaada haweenka iyo caruurtooda oo aan Canada ku lahayn xuquuqda daganaanshaha.

- | | |
|--|---|
| <ul style="list-style-type: none"> • Helitaanka waxbarasha oo xadidan (i.e. ESL& waxbarasha guud) • Daryeelka caafimaadka oo xadidan/ku filnayn • Guryaha la dego oo haddidan/ku habooneyn • Helitaanka adeegyada oo ka haddiddan • Gooni u faquuqid • Figrad qaldan oo laga qaato • Midab takoor | <ul style="list-style-type: none"> • Haween-nimo lagu xaqiro • Ku xad-gudbid (jir-dil, galmo khasab ah iyo maskax ahaan) • Aqoon la'aanta luqadda oo carqalad ku ah • Shaqo la'aan/shaqo ka heer liidata • Loo-shaqeeyaha oo ka faa'ideeysta • Ka-baqitaan in dib loo dhoofiyo • Dad dhexgal la'aan • Ka-baqitaan in ay isticmaalaan adeegga 911 |
|--|---|

Maxey haweenka aan lahayn xuquuqda daganaasha Dalka qatar ugu jiraan in lagu xoog sheegto?

Haweenka aan lahayn **xuquuqda daganaasha Dalka** waxay dumarka kale kala siman yihiin hababka qaarkood ee haween u xoog sheegedka, hase yeeshee way ka qatar badan yihiin xaalada dayacan oo ay ku nool yihiin awgeed:

- Helitaankooda wararka, la-talinta, iyo adeegyo bulsheedka kale aad bay u xadidan yihiin, haday wax ka helaanba.
- Haddi ay la kulmaan xaalad deg deg ah ma wici karaan poliska ; ayagoon qatar isu galin in Dalka laga saaro madaama Polisku uu karo in uu xiro qof asaga oo ka wakiil ah waaxda sodcaalka.
- Haddi qofka ay la nooshahay lagu soo oogo xad-kudub u ku sameeyay ; taa waxay ku dhalin karta haweenayda dhibaato aan laga soo waaqsan.
- Si sahlan kuma ay heli karaan adeegyada caadimaadka.

Maxaa loo baahan yahay in la qabto?

- In la nidaamiyo dadka aan Canada ku lahayn xuquuqda daganaasha Dalka.
- In aan la waydiin qofka sharciga u Dalka ku jogo ama aan polisku usan u sheegin waaxda sodcaalka ee Canada iyo kuwa kale oo adeegyada dadka u fidiya . Siyaasada Ha waydiin, Ha u sheegin waxay adeegyada dowlad hooseedka magaalada ka dhigaysaa kuwo u wada furan dadka magaalada degan oo idil; iyado aan dadka lagu kala takoorin xaladooda sharciiyeed ee ay Dalka ku jogaan.
- In wax laga badalo sharciga socdaalka si haweenka Dalka socdaalka ku jooga looga badbaadiyo ku xad-gudubka kafaala-qaadeyaasha iyo loo-shaqeeyeyashaba.

Ololaha logu taageerayo dadka aan lahayn xuquuqda daganaasha Dalka

STATUS waa is-baheysi balaaran oo shaqsiyaad iyo hay'ado u dooda in la nidaamiyo xaaladaha sharciyeed ee dadka ku nool Canada oo idil ee aan lahayn xuquuqda daganaasha Dalka. Email status@occasi.org ama wac (416) 322-4950 ext. 239.

Ololaha **Ha waydiin Hana U Sheegin** waxaa qabqaabiyey kooxo is-baheestay oo saldhigoodu yahay **Degaan Weynaha Toronto** (Greater Toronto Area). Bishi Maarso ee sanadkii 2004 waxaa si rasmi ah Toronto uga bilaabay No One is Illegal (**Qofna Si Sharci Darro Kuma Jogo**). Email info@daddtoronto.org

Qoraaalka dhacdodaan hubaalka ah waxaa aburay **Rights of Non-Status Women Network**. Ururkaan oo ah mid habeysan oo ay isu-kaashadeen hey'ado iyo xubno ka tirsan beelaha Toronto.

Mas'uliyadayadu waxey tahay in aan soo bandhigno carqaladaha ka hortaagan haweenka sharciga daganaanshaha aan haysan dhanka adeegyada iyo tahsilaadyada dadka loo fidiyo, oo ku raad leh u xoog sheegashada iyo ku had-gudubka lagu waxyeelaynayo dumarka, anago u isticmaaleyna wacyi gelin guud iyo u doodid isku-dabaridan si aan ku gaarno ujeedadayada oo ah in la helo is-bedel weeyn.

Si aad u hesho faah-faahin dheeri ah ama aad uga qayb gasho arrintaan, fadlan soo wac Clara Ho, (416- 392- 3135) Amelie Roy, Woman Abuse Council of Toronto (416-944-9242; amelier@womanabuse.ca)

Haddaad tahay haweenay dhibaataysan ama aad ogtahay qof la waxyeeleeyay, fadlan la xiriir Assaulted Women's Helpline 1-866-863-0511 ama 1-866- 863-7868 (TTY)